# Dhibaatooyinka Abaaraha Soomaaliya:

## Gurmad iyo Qorshe Cusub ayaa loo Baahan Yahay



The Heritage Institute For Policy Studies

Abriil 2017

Waxaa faafiyay Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2017, Muqdisho, Soomaaliya

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda**

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Bogga hore: meydadka xoolo ku dhintay gobolka Mudug

Xuquuqda © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash looma isticmaali karo https://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/

Kala soo bax qoraalka bogga www.heritageinstitute.org

# Tusmo

Qodobada daraasadda ugu muhimsan .......... 0

Hordhac .......... 1

Sababta abaarta iyo arrimaha saamaynta ku leh .......... 3

Wax ka qabadka abaaraha .......... 4

Dadaallada heer qaran .......... 5

Caqabadaha .......... 7

Gunaanad .......... 8

Talooyin tixgelin mudan .......... 9

## Qodobada daraasadda ugu muhimsan

- Abaarta ka socota Soomaaliya, looguna magac daray Sima oo loola jeedo, abaar baahsan, oo faafeysa waxa ay saamaysay dalka oo dhan. Haddii aanu roobku iman bartamaha bisha Abriil, islamarkaana aan olole gargaar bini'aadamnimo oo xooggan aan si dhakhso ah loo samayn, abaartu waxa ay isku beddeli kartaa macluul burburisa dalka. Boqollaal kun oo caruur, dumar iyo waayeel nugul ah ayaana naftooda ku weyn kara.

- Inkasta oo ay sarreyso xogta laga hayo abaarta hadda dalka ka jirta iyo cabsida laga qabo in ay macluul isku beddesho, haddana jawaabta beesha caalamka iyo istaraatiijiyadda Soomaalidu kula tacaalayaan ma ahan kuwo ku filan. Inta badan dadka ay abaartu ku habsatey ma helayaan waxyaabihii daruuriga ahaa ee ay noloshooda ku maareyn lahaayeen, inkasta oo ay hay'adaha Qaramada Midoobey soo gaartay ilaa saddex boqol oo malyan oo dollar. Xoolo dhaqato badanna waxa ayba waayeen qiyaastii siddeetan boqolkiiba xoolahoodii taas oo nuglaantooda heer halis ah sii gaarsiineysa.

- Sanado isxigey oo aan roobkii ku filnaa di'in ayaa qayb ka qaatay abaarta daba dheeraatay iyo dhibaatooyinka bani'aadamnimo ee ka dhashay. Balse taasi waa sharraxaad qabyo ah oo aan dhammaystirneyn. Colaado iyo siyaasad aan xasilooneyn ayaa sidoo kale ka dhigtay dalka mid u nugul abaaraha. Rubuc qarni muddo ku siman, maqnaanta ama itaal-darrida hay'adaha dowladda ayaa xagal daaciyey samaynta hay'ado shaqeeya iyo diyaarinta siyaasado gaarsiiya Soomaaliya in ay noqoto waddan wax-soosaarkiisu uu ku filnaado geeska Afrika, meesha uu dalku hadda ka yahay , goob uu caalamku iyada quudiyo.

- Samaynta Guddiga Qaran ee Gurmadka Abaaraha iyo guddiyada kale ee heer gobol, abaabulka ay sameynayaan qurbejoogta Soomaalida, iyo sidoo kale ol-olaha baraha bulshada waxa ay sameeyeen isbeddel muuqda, waxa ayna direen digniin ah in abaartu ay isku beddeli karto macaluul dilaa ah. In la sameeyo wasaarad u gaar ah gargaarka iyo maareynta musiibooyinka waxa ay sidoo kale tahay tallaabo dhanka saxda ah loo qaaday. Balse culays waxa uu ka ka imaan karaa, sida looga dhigi karo wasaaraddan mid tayo leh, iyada oo Soomaaliya noqotay waddan ku astaysan dalalka dunida ugu musuqmaasuqa badan iyo sidoo kale iyada oo ay gargaarka Soomaaliya uu gacanta ugu jiro, ayna ku dhagan yihiin ajaanib isku ballaariyey kaalintaas.

- Waa ayaan darro in aanay jirin ganacsato abaabulan oo dadaal ka bixinaya xallinta dhibaatada abaarta, waana lagama maarmaan in la fahmo siibashada ganacsatada iyo in laga bixiyo sharraxaad sababta ay saaxada uga maqan yihiin. In kasta oo deeqda ay bixiyeen shirkadaha isgaarsiinta waaweyn ee ku sugan Muqdisho iyo Hargeysa iyo kaalmadooda degdegga ah oo ka badan hal malyan oo doolar ay tahay arrin ay ammaan iyo kudayasho mudan.

## Hordhac

Soomaaliya waxa ka jirta abaar aad u daran oo saameyn ku yeelatay dalka oo dhan laga soo bilaabo dhulka oomanaha ah ee xoolo dhaqatada ku badan yihiin ee waqooyi ilaa bartamaha iyo koonfurta dalka. Abaartan waxa inta badan ay ka dhalatay roobabkii gu'ga (Abriil – Juun 2016) iyo deyrta (Oktoobar ilaa Disembar) oo aan sidii la filayey u di'in. Dadka ugu badan o ay abaartu saameysey waa beeraleyda koonfurta ku dhaqan iyo xoola dhaqatada gobollada Waqooyi ku nool sida Sool, Sanaag, Togdheer, Awdal, iyo weliba kuwa ku nool, Mudug, Galgaduud, Nugaal iyo Bari. Cunto iyo biyo yaraanta iyo sicirka cunnada oo sare u kacay, ayaa iyana sababay in xoolo badan ay dhintaan dad badanna ay bara kacaan. Barakacayaal badan oo ay abaartu saameysay ayaa hadda ku nool hareeraha wadooyinka iyaga oo aan heysan hoy ku haboon.

Bilowgii Janaayo 2017, xoolo dhaqato badan oo ku noolaa gobollada Sool, Sanaag iyo Mudug ayaa isugu yimid deegaanka Xumbeys oo 90 kiiloomitir dhanka bari kaga beegan magaalada Qardho ee gobolka Bari, halkaas oo uu roob aan badnayn uu ka da'ay. Daaqii yaraa oo lasoo wada miciin biday, waxa ay keentay dadkii deegaanka iyo dadkii soo hayaamay in ay baadkii iyo biyihii ku yaraadaan, waxana jira cabsi laga qabo in la isku dagaalo anfaca yar ee deegaanka yaalla.

Abaarta waxa ay sidoo kale si ballaaran u saameeyeen shacab badan oo ku nool deegaannada u dhaw xuduudda Soomaaliya ay la leedahay Itoobiya sida Buuhoodle, Wajaale, Matabaan, Gedo iyo Galdogob iyo Daarusalaam. Inkasta oo dadkaasi ay ku noolyihiin xaalado isku mid ah, haddana gurmad iyo ka-warqabid kama helin hay'adaha gargaarka bixiya.[1]

Gobolka Sool waxa uu kamid yahay gobollada ay abaarta aad u saameysay. Dadka xoola-dhaqatada ah oo abaartan ku waayay inta badan xoolohoodii waxa ay iskugu yimaadeen deegaanka Oog waxa ayna ka dhisteen xerooyin barakacayaal hareeraha waddada aadda Laascaanood. Qaar kamid ah dadka xerooyinkan ku nool waxa ay sheegeen inkasta oo ay ilaa afar bilood ku noolaayeen, in aanay helin wax kaalmo ah marka laga reebo booqasho aan badnayn oo ay deegaanka ku yimaadaan hay'ado Qaramada Midoobay katirsan iyo kuwo caalami ah oo qiimayn sameynayey.[2]

Sidaas si lamid ah, xaaladda bini'aadamnimo ee deegaannada maamulka Koonfur Galbeed Soomaaliya waa ay kasii dareysaa. Abaartu waxa ay aad ugu sii daran tahay deegaannadan sababta oo ah waxaa aad u hooseeya awoodda dhaqaale ee bulshada, waxaana jira cunno yari, taas oo u nugleysay cudurro badan iyo macluul aad u daran. Kaabayaasha dhaqaalaha ayaa burbursan, cudurraduna si dhaqso ah ayay ku faafayaan, falashada beeruhuna uma sahlana dadka, xoolana ma dhaqan karaan, taasi oo sii adkaynaysa helidda wax lagu noolaado. Tanina waxa ay keeneysaa macluul iyo nafaqo darro.[3] kana dhigaysaa heerka macluul oo ay wajahayaan dadku mid aad u daran.

Dhanka Bakool, maaddaama Al-Shabaab ay xoogaa ka fog yihiin waddada, dhulka howdka ahna ku jiraan, dadka beeraleyda iyo xoolo dhaqatada ah oo raadinaaya kaalmo

[1] Waraysi aan la yeelannay sarkaal arrimaha gargaarka ee Qaramada Midoobay ka tirsan, 21 Maarso 2017

[2] Waraysi aan la yeelannay isuduwe bulso, Xerada barakacayaasha Oog, gobolka Sool, 21 Maarso 2017

[3] Cilmibaare katirsan Machadka Heritage ayaa u safray gobollada Bay iyo Bakool soona qiimeeyay xaaladda ka jirta deegaannada.

bini'aadamnimo iyo biyo waxaa u fududaanaysa in ay gaaraan magaalada Xudur. Sikastaba ha noqotee, qiimaha biyaha ee deegaannada Koonfur Galbeed oo ay kamid tahay Xudur aad ayuu sare ugu kacay. Dhanka kalana, Al-Shabaab oo waddooyinka qaar xiray, adeegyo caafimaad iyo biyo nadiif ah oo aanan la heli karin ayaa ah caqabadaha ugu waaweyn oo heysta shaqaalaha hay'adaha gargaarka.[4]

Qiimaha galleyda magaalada Qoryooley waxa uu 51 boqolkiiba ka sarreeyaa qiimihii uu ahaa shanti sano ee lasoo dhaafay,[5] sicirka masagada Baydhabo-na 88 boqolkiiba ayuu sare u kacay. Heerka biyaha Webiga Shabeelle, qiyaastii 60 boqolkiiba ayuu ka hooseeyaa sidii caadiga ahayd, taasi oo yareyneysa biyaha loo heli karo xoolaha iyo waraabka beeraha. Dalagga la beeray Deyrta Janaayo waxa ay u badan tahay in ay ka hoos maro 60 – 70 boqolkiiba celcelis ahaan wax-soosaarkii shanti sano ee lasoo dhaafay taasi oo ka dhigaysa sanadkan mid kamid ah sanadihii ugu wax-soo-saarka yaraa.[6]

Marka la barbardhigo abaarihii hore, abaartan baaxaddeeda iyo xawaareheeda aad ayuu u sarreeyaa, waxaana ka dhashay dhimasho naf iyo xoolaba leh. Dadka ay saamaysay abaartan waxa ay ku magacaabeen Sima oo ay ku muujinayaan saameynta ballaaran oo ay yeelatay abaartan.

Sida ay sheegeen Guddiga Sare ee Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR), taariikhdu marka ay ahayd 21-ka Maarso, in ka badan 135,000 oo qof ayaa ku barakacay gudaha Soomaaliya, abaarta dalka ku dhufatay awgeed. Dadka waxa ay ka hayaamayaan deegaanadooda, waxa ayna aadayaan tuulooyinka, iyo waddooyinka gaarsiinaya magaalooyinka, si ay u helaan wax ay ku noolaadaan. In ka badan 6.2 malyan oo qof, oo ay ku jiraan ku dhawaad hal malyan caruur ah, ayaa hadda u baahan taageero deg deg ah oo naf badbaadin ah.[7]

Abaarahan soo noqnoqday oo Soomaaliya ka dhacayay tan iyo 1964-tii, waxaa ka dhashay saameyn bulsho, kuwo dhaqaale iyo kuwo deegaan oo aad u baaxad weyn. Goobaha ay abaarahan saameeyeen waxa ay noqdeen meelo aad u nugul, muddada yar oo ay isku jiraan abaaraha ayaanan u ogolaan dadka deegaannada in ay soo kabtaan. Abaarahan soo noqnoqday waxa ay sidoo kale sababeen xaalado cunno yari, liidasho daryeelka caafimaad iyo in aanan la helin biyo nadiif ah, taasi oo keentay dhimasho, baaba' xoolo iyo dhulkii daaqsinta iyo beerashada oo dayacma. Tanina waxa ka dhashay barakac, cudurro faafa, sal-guurka dadka miyiga deggan, fakhri dadka magaalooyinka deggan iyo dhimashada caruurta da'doodu yar tahay oo dalka ku badatay.

Cilmibaarayaal katirsan Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda ayaa ku safray deegaanno ay abaartu saameysay oo katirsan Soomaaliland, Puntland iyo Koonfur Galbeed waxa ayna soo qiimeeyeen saameynta ay abaartu ku yeelatay dadka ay saameysay. Warbixintan waxa ay faham baahsan ka bixinaysaa abaaraha kusoo noqnoqday Soomaaliya, waxa ayna

[4] Wareysi lala yeeshay xubin katirsan maamulka degmada Xudur, Bakool, 10 Maarso 2017

[5] UN OCHA, "Improve food access to reduce acute humanitarian needs among the most vulnerable urban and IDPs integrated into host communities in food crisis in Qorioley district of Lower Shabelle Region", January 2017.

[6] Famine Early Warming Systems Network, "SOMALIA Food Security Outlook Update", October 2016 - January 2017, http://www.fews.net/sites/default/files/documents/reports/Somalia_FSOU_11_2016_0.pdf

[7] UN High Commissioner for Refugees (UNHCR), "Inside Somalia, drought displacement growing",21 February 2017, http://www.refworld.org/docid/58ac33a84.html

qeexeysaa baaxadda abaarta iyo waxyaabaha sababa. Daraasaddu waxa ay sidoo kale taxliilinaysaa kaalmada gargaar ee hadda socota waxa ayna ugu dambayn soo jeedineysaa talooyin mudan in la tixgeliyo.

## Sababta abaarta iyo arrimaha saamaynta ku leh

Labo xilli-roobeed oo roob badan aanu di'in ayaa sababay biyo yaraan taasi oo ay ka dhalatay in ay dhintaan xoolo badan oo ay ku dhaqan yihiin u ah Soomaalida miyiga. Waxa sidoo kale jirtay in Webiga Shabeelle uu isna biyo yareeyay, taas oo hoos u dhac ku keentay wax soo-saarka beeraha. Waxsoo-saarka xoolo dhaqatada iyo beeraleyda waxa si daran u saameeyay biyo yaraanta maadaama heerka biyuhuna aanu ahayn mid ku filan waraabka beeraha.[8]

Waxaa kale oo ka qayb qaadatay in dhibaatooyinka abaaruhu ay sii xoogeystaan, iyada oo aanay jirin hay'ado dowladeed oo heer qaran iyo heer gobol oo si mug iyo macno leh u shaqaynaya. Wasaaradaha dalka ee dhirta, caafimaadka xoolaha, guriyeynta, caafimaadka iyo adeegyada bulshada – sida kuwa kheyraadka biyaha iyo macdanta – si wanaagsan uma shaqeeyaan. Waxa ay ahayd in ay wasaaradahan xal u helaan dhibaatooyinka cunto yarida, cudurrada faafa, biyo yaraanta, iyo kaabayaasha dhaqaalaha, sida waddooyinka, kuwaas oo ah kuwo dhammaan liita. Sidaas darteed, waxaa adag in qorshe maangal ah la dejiyo oo lagula tacaalayo u nuglaanta dalka ee daadadka, abaaraha iyo cunto yarida.

Marka la eego istiraatiijiyadda xal u helidda musiibooyinka wakhtiga fog, deeq bixiyayaasha caalamiga ah ma aanay hirgelinin mashaariic ku filan oo bulshada u sahlaya in ay abaaraha u adkaystaan, sida abuurista habab kala duwan oo nolosha lagu soo saarto, hirgelin wacyigelin dhanka cimillada ah iyo in la baro bulshada deegaanka iyo xirfadaha lagula tacaalo musiibooyinka soo noqnoqda oo ka dhasha cimilada. Baaqsiga arrimahaas xaasaasiga ah laga baaqsadayna waxa uu ka qeyb qaatay abaaraha soo noqnoqday ee Soomaaliya.

Arrinta ugu adag ee heysata gobollada ay abaartu saamaysay waa iyada oo aanay jirin qorshe gargaar bini'aadamnimo nidaamsan oo mideynaya dadaallada heer gobol, heer qaran iyo heer caalami ee lagu wajahayo dhibaatooyinkan bini'aadamnimo ee soo noqnoqdey. Ma jirto istaraatiijiyad lagula tacaalo abaaraha oo ka shaqeyneysa heer qaran ama heer gobol taasi oo weliba hagta gargaarka caalamiga ah.[9] Natiijada ka dhalatay tanina waxa ay noqotay in deeq bixiyayaasha caalamku ay wakhti danbe soo gaaraan shacabka si waliba teel-teel ah taag-taagsi badanna uu ku jiro. Arrinkan waxa uu ka dhigay kaalmada bini'aadamnimo mid hoosaysa baahidana aan dabooli karin.

Soomaaliya waxa ay ku jirtey xaalad doorasho siddeedii bilood ee lasoo dhaafay, Hoggaanka lasoo xulay iyo kuwa lasoo doortayn weli sooma ban-dhigin qorshe cad oo ay kula tacaalayaan abaarta. Dowladda dhexe iyo maamul gobolaadyada midkoodna ma laha tabar ay ku xalliyaan musiibada qaran wakhtiga fog ama wakhtiga dhaw.

Sababo la xiriira gurmadka oo lala soo daahay, Soomaali ku nool deegaanno badan waxa soo

[8] Xaaladda Abaarta Soomaaliya Jan 2017,01 Feb 2017, http://reliefweb.int/map/somalia/somalia-drought-conditions-jan-2017

[9] Wareysi aan la yeelannay xubin katirsan Guddiga Qaran ee Gurmadka Abaaraha, 2 Maarso 2017

wajahay cunno iyo biyo yari, adeeg caafimaad deg deg ah oo aan jirin, barakac, iyo caqabado kale. Dad badan waxa ay ka daaleen la tacaalidda musooooyin is xigxiga. Qaybo kamid ah dalka, adkeysiga yarida dadka waxa saameyn ku yeeshay musiibooyin is xigxigay sida daadadkii badnaa ee sanadkii 2015 oo ay sababeen roobab xooggan oo ku dhuftay bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya, taa oo ay xigtay fatahaaddii webiga Shabeelle ee sanadkii 2016 iyo hadda oo ay abaar daran oo weliba baahsan ay ku dhufatay dalka oo dhan.

Arrimaha kale ee ka qeyb qaatay musiibooyinka bini'aadamnimo waxa kamid ah jaridda dhirta oo inta badan lagu sameeyo iyada oo dhuxul laga dhigayo, xaalufin dhanka daaqsinka ah iyo colaado qabiil. Mid kamid ah tusaalooyinka muuqda waa yaraanta gargaarka la gaarsiiyo meelaha ay al-Shabaab ku xooggan yihiin taasi oo sii murjisay dhibaatoyinka abaaraha oo ay wajahayaan bulshada maaddaama al-Shabaab ay weli maamulaan qeybo kamid ah bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya. Khatarta ay al-Shabaab ku yihiin nabadda iyo amniga waxa ay xusuusin cad u tahay itaal yarida dowladda oo aan awoodin n ay gudato mid kamid ah waajibaadkeeda ugu muhiimsan oo ah in ay dalka kusoo celiso nabad iyo kala danbeyn.[10]

## Wax ka qabadka abaaraha

Marka la eego istaraatiijiyadaha lagula tacaalayo meelaha sida weyn kaalmada looga baahan yahay, jawaabta deeq bixiyayaasha caalamku ka bixiyeen abaarta waa mid hooseysa.Waxa jiray warbixinno bille ah oo digniin bixinayey ilaa bilowgii sanadkii 2016. Si kastaba ha ahaatee, deeq ku filan oo lagu caawiyo beeraleyda iyo dadka ku nool baadiyaha lama soo uruurinin si ay ula tacaalaan dhibaatooyinka cunto yarida. Qaramada Midoobay waxa aysan weli ka soo waaqsan fashilkii kasoo gaartay baajintii macluushii baahsaneyd ee sanadkii 2011.

UNICEF iyo Barnaamijka Cunnada Adduunka (WFP) waxa ay kaalmo siiyeen dad ku nool waqooyiga Soomaaliya oo iyagu la dhibaatoonayey abaartii darneyd iyo xaaladaha aadka u daran ee ka dhashay El Niño sanadkii 2016.[11] Barnaamijka Cunnada Adduunka waxa uu sheegay in uu qorsheynayo in uu wax ka qabto dhibaatooyinka cunno iyo nafaqo yari ee hadda jira iyaga oo "kaalmo lacageed iyo mid deeq oo cunno siinaya dadka aadka u nugul ee ku sugan goobaha abaartu saameysay ee waqooyiga, bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya muddo lix bilood ah." Intaa waxaa dheer, maaddaama Barmaamijka Cunnada Adduunka (WFP_uu maamulo diyaaradaha Qaramada Midoobey, waxa ay WFP fududeynayaan in si dhaqsi ah loo gaarsiiyo kaalmo naf badbaadin ah dadka tabaaleysan iyo in ay taageeraan safarada shaqaalaha gargaarka ee Soomaaliya.[12]

Dalalka Carabta iyo dunida Muslimka ayaa iyaguna sidoo kale caawimaad dadka ay abaartu saameysay. Xarunta Gargaarka bini'aadamnimo ee boqor Salmaan iyo Ururka Iskaashiga Islaamka waxa ay 30,000 oo cunno ah u qeybiyeen 18,000 oo dadka ay abaartu saameysay ah. Dowladda Turkiga waxa ay 700,000 oo dollar ugu deeqday danyarta abaartu ay ku saameysay Soomaaliya.[13] Bilowga Janaayo 2017 wafdi ka

[10] Wareysi lala yeeshay masuul sare oo katirsan dowladda Federaalka Soomaaliya, 15 Maarso 2017

[11] World Food Programme, "UNICEF And WFP Respond To Needs Of Drought-Affected People In Somaliland And Puntland", 11 April 2016.

[12] WFP Somalia Country Brief, January 2017, http://reliefweb.int/report/somalia/wfp-somalia-country-brief-january-2017

[13] Daily Sabah, "Turkish Red Crescent mobilizes for unprecedented famine threat in Somalia", 26 March 2017,

socday Imaaraadka Carabta oo booqday Soomaaliland waxa uu qiimeyn ku sameeyay mashruuc ay maalgeliyeen oo lagu dhisay laguna qalabeynayey 20 ceel biyood oo la dhameystiray looguna talo galay in ay biyo ku filan oo nadiif ah siiyaan gobollada Sool iyo Sanaag.[14]

Hayado iyo dalal kale oo kamid ah beesha caalamka ayaa iyagana ballanqaaday in ay kaalmo siinayaan Soomaaliya. Boqortooyada Ingiriiska waxa ay ballanqaadday in 12.5 malyan oo dollar ku bixineyaan Gurmadka abaaraha iyaga oo soo marinaya WFP, UNICEF, iyo Ururka Beeraha iyo Cunnada ee Qaramada Midoobay oo loo yaqaanno FAO. Waaxda Horumarinta Caalamiga ee Ingiriiska ayaa 22-kii Febaraayo 2017, waxa ay ku dhawaaqday in ay Soomaaliya siinayaan 125 malyan oo dollar oo kaalmo deg deg ah oo dheeraad ah.[15] Sanduuqa Houmarinta Qatar waxa uu ballan qaaday in uu fulinayo mashruuc adeegyo caafimaad oo kala duwan bixinaya, taageeraya isbitaallada, bixinaya cunno isla markaana lagu qodayo ceelal.[16] Dowladda Kanada waxa ay ballan qaadday in ay Soomaaliya ku taageereyso ilaa 21 malyan oo doolarka Kanada ah.[17]

## Dadaallada heer qaran

Dowladda Federaalka waxa ay sameysay Guddiga Qaran ee Gurmadka Abaaraha, waxa ayna ugu baaqday beesha caalamka iyo Soomaalida ku nool dalka iyo kuwa dibaddaba in ay jawaab deg deg ah ka bixiyaan dhibaatooyinka abaaraha. Shaqada guddiga waxaa lagu tilmaamay in uu sameeyo ol-ole wacyigelin, in uu uruuriyo kaalmo deg-deg ah, iyo in uu isku xiro lana shaqeeyo guddiyada abaaraha gobollada. Waxa uu guddiga la shaqeeyaa ganacsatada, wasaaradaha arrimaha abaaraha ku shaqada leh, qorbejoogta, iyo beesha caalamka si la isugu dubbarrido kaalmada loona uruuriyo deeq lagu daboolo baahida sii kordheysa oo haysata dadka ay abaartu saamaysay. Guddiga waxa uu uruuriyay ilaa 2 malyan oo dollar taasi oo muujineysa in dowladda iyo laamaha loo xilsaaray aanay itaal badan u lahayn maareynta musiibadan qaran.[18] Tabardarrida guud ee heysata dowladda waxa asal u ah haykalka dowladnimo oo liita ama hay'adihii dowladda oo si magac dhaafsiisan aan u dhisnayn iyo doorashooyinkii daba dheeraaday oo diiraddii iyo dhaqaalihii ka weeciyay abaaraha.

Qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaalida ayaa sidoo kale is abaabulay si ay abaarta uga jawaabaan. Guddiyo heer bulsho ah oo ay hormuud u yihiin culimada diinta ayaa

https://www.dailysabah.com/turkey/2017/03/27/turkish-red-crescent-mobilizes-for-unprecedented-famine-threat-in-somalia

[14] Somaliland Sun, "Somaliland: UAE Responds to Drought Relief Appeal", 22 January 2017, http://www.somalilandsun.com/development-aid/9999-somaliland-uae-responds-to-drought-relief-appeal

[15] Dowladda Ingiriiska, "UK outlines new humanitarian support and urges international community to save lives before it's too late", 22 February 2017, https://www.gov.uk/government/news/uk-outlines-new-humanitarian-support-and-urges-international-community-to-save-lives-before-its-too-late

[16] "QRCS to Commence Relief Intervention in Somalia [EN/AR]", 22 Jan 2017, http://reliefweb.int/report/somalia/qrcs-commence-relief-intervention-somalia-enar

[17] Kanada waxay ballanqaadday 120 Milyan oo dollar, Kaddib markii QM ay ka digtey 'Musiibadii Bini'aadamnimo ee ugu darnay ilaa dagaalkii labaad ee dunida', https://www.thestar.com/news/canada/2017/03/17/canada-pledges-120m-after-un-warns-of-largest-humanitarian-crisis-since-wwii.html

[18] Wareysi aan la yeelannay xubin katirsan guddiga abaaraha, 16 Maarso 2017

samaysmay, guddiyadan ayaa isticmaala warbaahinta bulshada, idaacadaha iyo TV-yada si ay lacago uga uruuriyaan muwaadiniinta deeq samafal ah ku tabarucaya.

Inkasta oo ay adag tahay in la sheego lacagaha saxda ah ee shacabku uu ku deeqay, guddiyada aan rasmiga ahayn ee heerka bulsho waxa ay lacago kasoo uruuriyeen dadka gudaha dalka ku nool iyo qurbejoogta . Caado ama diin ahaanba, dad badan oo sadaqo baxsada waxa ay jecel yihiin in ay saddaqadoodu u asturnaato, oo aan la shaacin. Sikastaba ha ahaatee, labo kamid ah deeqaha ugu badan waxa ay ka yimaadeen shirkadaha isgaarsiinta Hormuud iyo Telesom. Hormuud waxa ay ku deeqday 800,000 oo dollar iyada oo ay Telesom bixisay 500,000 oo dollar.[19] Shirkad kale ayaa 10,000 oo dollar ku wareejisay guddiga abaaraha, balse ganacsatada kale gaar ahaan kuwa ku sugan Muqdisho uma ahayn deeqsiyaal sidii abaarihii hore oo kale.[20] In ganacsatadu ay ka maqan tahay dadaallada gargaarka iyaga oo kaalin hoggaamineed ka qaadan jiray gurmad-yadii hore, waxa ay u baahan tahay in la daraaseeyo, lana furdaamiyo.

Bulshada rayidka, dhaqdhaqaaqyada warbaahinta bulshada, iyo qurbejoog Soomaaliyeed ayaa sidoo kale kaalin weyn ka qaatay arrimaha abaaraha, waxa ayna abaabuleen Soomaalida iyo dadka aan Soomaalida ahayn ee dunida ku nool, si ay deg deg wax uga qabtaab abaarta, islamarkaana looga hortago in abaartu aysan isku beddelin macluushii 2011 oo kale. Ol-olayaasha warbaahinta bulshada ee la xusi karo waxaa kamid ah CaawiWalaal oo ay sameeyeen dhalinyaro Soomaaliyeed oo iyagu uruuriyay ilaa hadda 59,000 oo dollar.[21] Daryeel Bulsho waxa uu sidoo kale uruuriyay lacago islamarkaana waxa ay cunno iyo biyo ka qeybiyeen gobollo badan.[22] The Somali Canadian Relief Task Force waxa uu usoo diray ku dhawaad konton kun oo dollar guddiga qaran ee abaaraha.[23] Waxa ay sidoo kale u ololeeyeen in Dowladda Kanada kaalin ka geysato gurmadka abaaraha.[24]

Abaabullo kale oo caalami ah sida Love Army for Somalia oo ay sameeyeen dad dunida can ka ah, ayaa iyaguna maalmo gudahood ay ku uruuriyeen in ka badan 2 malyan oo dollar. Waxa ay sidoo kale kooxdan ku qanciyeen Turkish Airlines in ay diyaarado gargaar deg deg ah qaada usoo dirto Soomaaliya.[25] Dadaallo badan oo kale oo ay dad iskood isku abaabulay ka sameeyeen Facebook iyo Twitter iyo meelaha kale oo ay bulshada ku kulanto sida golayaal WhatsApp iyo Viber saldhig ka dhigtay, ayaa sidoo kale lacago badan loogu uruuriyay dadka ay abaartu ku saameysay gobllada oo dhan.

Taageerada ay shakhsiyaadka iyo bulshada u fidinayaan qaraabadooda waa mid aan la xusin inteeda badan. Balse waxa cad in qurbejoogta, muwaadiniinta ku nool magaalooyinka, hoggaanka diinta oo isticmaalaya masaajiddada,

[19] Eeg http://somaliamediamonitoring.org/january-27-2017-morning-headlines/

[20] Wareysi aan la yeelannay xubin katirsan guddiga abaaraha, 23 Maarso 2017

[21] Wareysi aan la yeelannay xubin katirsan CaawiWalaal, 26 Maarso 2017

[22] Wareysi aan la yeelannay xubin katirsan DaryeelBulsho Volunteer, Hargeysa, Maarso, 2017

[23] Wareysiyo dhowr ah oo lala yeeshay xubno katirsan guddiga, Abriil 2017

[24] Hiiraan Online, Open Letter to the Canadian PM: Urgent Appeal for Famine Prevention in Somalia, 27 February 2017, https://www.hiiraan.com/news4/2017/Feb/140749/urgent_appeal_for_famine_prevention_in_somalia.aspx

[25] Kalhan Rosenblatt, “Ben Stiller, Colin Kaepernick, and Others Raise Millions to Help Famine-Hit Somalia”, 22 March 2017, http://www.nbcnews.com/pop-culture/pop-culture-news/ben-stiller-colin-kaepernick-others-raise-millions-help-famine-hit-n736996

abaabulayaasha bulshada, qurbejoogta dalka ku soo laabtay oo baraha bulshada aadka u isticmaala, warbaahinta iyo qaar kamid ah ganacsatada ay saameyn muuqata sameynayaan. Kuwan, gaarsiintooda gargaarka dadka u baahan, waa uu dhaqso badan yahay, waxa uuna tixgelin iyo hor-marin siinayaa dadka aadka u il-daran oo ay abaartu saameysay.

Tusaale ahaan, shirkadda Hormuud waxa ay kaalmo siineysaa dadka abaartu saameysay iyada oo isticmaaleysa laamaha ay ku leedahay gobollada islamarkaana aan gurmadka lagu curyaamin maamul is-dulsaaran, kharash badanna aanay ku bixin maamul iyo maarayn samafalkaas, aynka ka badbaadaan caqabado dhanka dhaq-dhaqaaqa iyo gaarsiinta ah.[26]

Qurbejoogta ku nool dibadda waxa ay sidoo kale sameeyeen guddiyo ku saleysan gobollada ay asal ahaan ka soo jeedaan, waxa ayna u xawilaan lacagta iyaga oo isticmaalaya dad si toos ah u gaarsiiya kaalmada dhibbanayaasha loogu talo galay. Laakiin marka la eego baaxadda gargaarkan deg-degga ah, gurmadka hadda socota waxa lagu tilmaami karaa “dhibic biyo ah oo ku dhacday bad weynta”.[27]

## Caqabadaha

Caqabadda ugu weyn ma ahan sida nolosha dadka iyo xoolaha loo badbaadin lahaa, balse waa sida dib loogu soo nooleyn karo hab nololeedkii ka burburay dadka ay abaartu saameysay. Waxaa jira welwel sii kordhaya ee la xiriira xawaaraha iyo baaxadda howlgallada gargaar iyo sidoo kale gaarsiinta kaalmada gobollada ay abaartu saameysay. Waxaa wel-wel leh in shacab badan oo ku nool deegaannadii ay abaartii sanadihii 2011-2012 saameysay in aanay weli soo kaban, gaar ahaan kuwa aan awoodin inay guur-guuraan. Dhibaatooyinka kale ee taagan waxa kamid ah barakaca iyo hayaanka qaxootiga, caqabadaha siyaasadeed, caqabadaha la dagaallanka argigixisada, iyo khataraha dhanka sharciga iyo sumcadda ah oo ka dhigaya gaarsiinta kaalmada bini’aadamnimo mid adag. Intaa waxaa dheer, warbixinnada laga helayo deegaannada waxa ay tilmaamayaan in uu yar yahay iskaashiga iyo iskawarqabka u dhexeeya kooxaha gargaarka kuwaas oo la xiriira in sida ugu munaasabsan loo kala hormariyo dadka abaartu saameysay iyo in samafalayaashu ay kala weeciyeen gargaarkooda si aan meelna la isugu tegin, meelna loo hilmaamin.

Ol-ole qaran oo xooggan wali ma muuqdo, inkasta oo ay jiraan dadaallo uu sameynayo Guddiga Qaran ee Gurmadka Abaaraha. Guddigan oo ka kooban xubno metela gobollada, dowladda federaalka ah iyo bulshada rayidka, sida culimada, waxa ay sameeyeen wacyigelin waxa ayna uruuriyeen 2 Malyan oo doollar oo kaliya. Qaramada Midoobay waxa ay dalbatay 885 malyan oo doollar waxa ayna soo uruurisay qiyaastii in ka badan 300 malyan oo doollar inkasta oo inta badan lacagahaas aan weli la qaybin.[28] Maaddaama abaartan ay kusoo aaddey xilli doorasho wakhti dheer ah dalka ka socotey, waxa ay dib u dhac ku keentay taageero, jiheyn iyo hoggaan dowladeed oo aad loogu baahnaa, oo ay kamid tahay, ku wejihidda maalka iyo muruqa dowladda xakamaynta abaaraha.

Musuqmaasuqa, wax is daba marsiin, iyo weecinta gargaarka, oo saameyn xun ku yeeshay

[26] Wareysi aan la yeelannay shaqaale katirsan Muasasada Hormuud, Muqdisho, 17 Maarso 2017

[27] Wareysi aan la yeelannay xubin katirsan qorbejoogta Soomaalida oo ka yimid Mareynaka, Humbeys, Bari, 6 Maarso 2017

[28] FTS Tracking Humanitarian Aid Flows, https://fts.unocha.org/appeals/528/summary

la tacaaliddii macluushii 2011, waa uu soo noqon karaa sanadkan 2017. Kaalmo bini'aadamnimo oo la xaday ama la isku dayey in la leexsado ayaa lagasoo sheegay dhowr meel oo ay abaartu saameysay.[29] Tillaabooyin dheeraad ah waa in la qaadaa si loo xaqiijiyo in gargaarka uu gaaro dadkii loogu tala galay, gaar ahaan haddii ay abaartu kasii darto heerka ay hadda joogto, islamarkaana hayadaha gargaarka ay kordhiyaan caawinaaddooda iyaga oo aan hagaajinin isku xirnaanta iyo gurmadka goobaha aadka u daran.

Maamulka cusub ee Mareykanka waxa uu muujiyay in uu jari doono ku dhawaad 30 boqolkiiba kaalmada bini'aadamnimo uu siiyo dunida.[30] Maaddaama Soomaaliya ay tahay waddanka ugu badan ee ay gasho deeqaha uu Barnaamijka Cunnada Adduunkua (WFP) uu kaalmo gargaar ahaan uga helo Mareykanka, dhimidda Maraykanka ee deeqaha dibaddu waxa uu natiijo aan wanaagsanayn u noqon karaa gurmadka gargaar ee Qaramada Midoobay ay u qorsheysay dalalka u nugul abaaraha, sida Soomaaliya. Sidaas si lamid ah, dhulka ballaaran oo ay al-Shabaab ka taliyaan waxa ay caqabad weyn ku tahay in kaalmo la gaarsiiyo saboolka ugu baahida badan. Dad aad u badan, oo u badan dumar iyo carruur, ayaa u dhimanaya shuban biyood, lana itaal daran macluul, maadaama hay'adaha gargaarka aanay awood u lahayn in ay adeegyo caafimaad oo deg deg ah gaarsiiyaan dadka ay abaartu ku saameysay goobaha ay al-Shabaab ku xooggan yihiin.

## Gunaanad

Inkasta oo roobabkii la filayay oo aanan di'in, inta badan loo sababeynayo abaarta hadda jirta, dhibaatada abaarta Soomaaliya waxa ay calaamad u tahay caqabado tira badan oo u baahan xal istaraatiiji ah. Abaaraha kusoo noqnoqday Soomaaliya waxa sidoo kale sii xumeeyay iyadoo aanay jirin hay'ado dowladeed oo si wanaagsan u shaqeynaya, taasi oo mid adag ka dhigtay gaarsiinta adeegyada aasaasiga ah shacabka beeraleyda iyo xoolo dhaqatada ah ee ku nool dalka. Caqabadaha kale waxa kamid ah, dib u dhaca gargaar ee caalamiga ah iyo sidoo kale yaraanta dhaqaalaha ay heystaan dadka kunool dalka (dowladda ama shacabka) iyo yaraanta iyo daahidda deeqaha ka imanaya hay'adaha gargaarka caalamiga ah. Dagaallo daba dheeraaday oo u dhexeeya al-Shabaab iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo sidoo kale colaado u dhexeeya beelaha oo ka jira meelo kamid ah dalka, waxa ay dhammaan yareeyeen hawl-galkii iyo gurmadkii degdegga ahayd oo loo baahnaa in la helo.

Waxyeeleynta deegaanka sida xaalufinta iyo jaridda dhirta ayaa sidoo kale ah arrin qeyb ka qaadatay baaxadda buruburka laga dhaxlay abaarta. Maqnaanshaha istaraatiijiyado lagula tacaalo abaaraha iyo sidoo kale in bulshada, dowladda, iyo beesha caalamka aanay awoodin in ay dejiyaan istaraatiijiyado waxtar ah oo si degdeg ah loogu xakameeyo abaarta, waxa ay keeneen in khatar loogu jiro ayna suuragal tahay in mar kale ay Soomaaliya ku dhufato macluul dhimasho badan sababta.

In ka badan 6.2 malyan oo qof ayaa ku jira xaalad adag oo u baahan kaalmo deg deg ah. Guddiga Qaran ee Gurmadka Abaaraha iyo sidoo kale dadaallada ay bilaabeen shacabka waa arrin wanaagsan, marka laga eego dhinacyada

[29] Wareysi aan la yeelannay masuul sare oo katirsan maamulka gobolka Sool 2 Maarso 2017; wareysi aan la yeelannay Guddiga Qaran ee Gurmadka Abaaraha 22 Maarso 2017.

[30] VOA, Africa Aid Officials Concerned a Proposed US Aid Cuts, http://www.voanews.com/a/africa-aid-officials-concerned-at-proposed-us-aid-cuts/3773854.html

wacyigelinta iyo abaabulka, balse xaqiiqadu waxay tahay kaligood kuma filna xakamaynta abaarta iyo aafooyinka ka dhashay. Wakhtiga warbixintan la daabacay, Qaramada Midoobay waxa ay heshay 41 boqolkiiba codsigoodii lacagihii ay Soomaaliya wax ugu qaban lahaayeen,[31] xaaladdana waxa ay kasii liidataa sidii ay bilo kahor ahayd. In aanu roobkii la filayay di'in waxa ay keeni kartaa in macluushii 2011 dib usoo laabato. Haddii ay taasi dhacdana, howlgallo gargaar oo aad u baaxad weyn kaliya ayaa joojin kara musiibada. Soomaalida iyo beesha caalamka midkoodna uma abaabulna in ay waajibka ka saran dadka Soomaaliyeed sida uu yahay ay u gutaan.

## Talooyin tixgelin mudan

- Tiro aad u badan oo kamid ah malaayiinta Soomaaliyeed ee u baahan kaalmo naf badbaadin ah, ma helin caawinaaddii ay u baahnaayeen, tanina waxa ay u baahan tahay in sida ugu deg degta badan loo saxo. Gurmadka oo dib u dhacay ayay ahayd sababta ay dad badani ugu dhinteen macluushii 2011. Hay'adaha gargaarka caalamiga ah, gaar ahaan hay'adaha Qaramada Midoobay oo inta badan yabooha gurmadka Soomaaliya dirta wixii deeq-bixiyayaashu ay Soomaali u qoondeeyaanna badankoodu gacantooda ku soo dhaco, waa in ay si aan dib u dhac danbe lahayn maatada ugu gudbiyaan deeqaha ay ku soo qaadeen magaca dadka Soomaaliyeed. Si gaar ah waa in diiradda loo saaraa goobaha ay adag tahay in gargaarka la gaarsiiyo. Deegannada dhaca xuduudda Soomaaliya la leedahay Itoobiya, oo iyagu ka fog diiradda warbaahinta iyo madaxda dowladda, waa in aanan la hilmaamin. Goobahan oo kalana waa meelaha looga faa'iideysan karo isla shaqaynta Qaramada Midoobey, Guddiga Qaran ee Gurmadka Abaaraha iyo guddiyada kale ee gobollada.

- Sababta ugu weyn oo caqabadaha deegaan ama culaysyada abaaraha Soomaaliya ay isugu beddelaan musiibooyin bini'aadamnimo waa iyada oo aanay shacabku lahayn awood adkeysi iyo in dowladdu aanay awood u lahayn in ay dejiso farsamooyin lagula tacaalo abaaraha. Wakhtiga dhaw, waa in la dedejiyaa dib soo celintii hab-nololeedkii bulshada xoola dhaqatada ah. Wakhtiga dheerna, waa in lo guntadaa hirgelita mashaariic lagu dhisayo kaabayaasha iyo aqoonta aasaasiga ah ee soo kabashada, gaar ahaan deegaanada ay ku nool yihiin xoolo dhaqatada iyo beeraleyda.

- Abaaraha waxaa la maareyn karaa, macluulna laga hortagi karaa marka uu dalku yahay nabad, hay'ado dowladeed oo shaqeynaya, lalana xisaabtami karaana ay dhisan yihiin. Dagaallada 10 sano jirsaday ee lagula jiro al-Shabaab iyo xasilooni darrada ay abuureyso waxa ay sii xoojisay cunno yarida soo noqnoqotay. Maadaama colaadaha oo sii socda ay u badan tahay in dhibaatada heysata dadka tabaaleysan ay sii kordhiso, al-Shabaab iyo dowladda waa in ay wada hadlaan. Ku guuldarreysiga in la sameeyo hay'ado dowladeed oo tayo leh - heer qaran iyo heer gobol - waxa ay sidoo kale dib u dhac kusii keeneysaa dadaallada la tacaalidda abaaraha iyo sidoo kale iskaashiga caalamiga ah ee loo baahan yahay.

[31] Lacagta u soo xaroota UN-ka waa ay kordhaysaa mar kasta, https://fts.unocha.org/appeals/528/summary

- In la sameeyo Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waa go'aan wakhitigiisii la qaatay. Si kastaba ha noqotee, waa in laga dhigaa wasaarad shaqaysa. In la abuuro wasaarado aan shaqeynin oo aan dhaqaale ku filan loo qoondeyn waa waxa ka dhigay Soomaaliya dal fashilmay. Qaybaha bulshada iyo hay'adaha gargaarka caalamiga ah waxa dusha ka saaran masuuliyadda gargaarka gurmadka bini'aadamnimo in kasta oo masuuliyaddaas siday ahayd aan loo qaadin. Waxa suuragal ah in ay u maleynayaan in masuuliyaas ay u istaagtay hay'ad cusub. Xaqiiqaduse waxa ay tahay in dowladda, guddiga abaaraha ama wasaaradda cusub ee arrimaha bini'aadamnimada aanay middoodna wax weyn ka qaban maaraynta musiibooyinka. In la sameeyo wasaarad u gaar ah arrimaha gargaarka islamarkaana lagu guuldarreysto in ay shaqeyso waxa ay jibin kartaa mabda'a caalamiga ah ee loo yaqaan 'dhib ha geysan'.

- Maqnaanshaha muuqda ee ganacsatadu ay ka maqan yihiin dadaallada gargaarka waa mid si weyn looga tabey, aanna laga filayn. Waa in ay ganacsatadu waxqabad muujiyaan. Qurbejoogta, inta baraha bulshada ka dadaalaysa, iyo bulshada rayidka waxa ay hormuud ka yihin wacyigelinta. Waxa ay sidoo kale sameynayaan caawinaad hagar la'aan ah, waana in ay laban laabaan dadaalkooda.

- Waxaa lagama marmaan ah in la sameeyo siyaasadda qaran ee sugidda ammaanka quudka. Waxa sidoo kale muhiim ah in la hormariyo farsamooyinka maaraynta bulshada sida in cunnada loo keydsado mustaqbalka iyo sidoo kale in la kala duwo hab-nololeedka bulshada. Waa in ay jirtaa olole joogto ah iyo wacyigelin dhanka deegaanka ah iyo muujinta khataraha ay ku keeni karaan bulshada beeraleyda iyo xoolo dhaqatada ah, si looga hortago musiibo ay dadku iyaga sabab u yihiin oo ay sameysteen.

- Dowladda dhexe iyo maamul goboleedyada waa in ay sidoo kale is-waafajiyaan istaraatiijiyadaha loogu talo galay maaraynta musiibooyinka ee mustaqbalka dheer. Dhinacyada u baahan in maanka lagu hayo, waxaa ka mid ah in xoogga la saaro in la maalgeliyo goobo biyaha keydiya, dhismaha waddooyinka, iyo horumarinta kaabayaasha kale.

The Heritage Institute For Policy Studies